DOWLAD G. PUNTLAND EE SOOMAALIYA
Wasaarad Arimaha Gudaha, D/ Hoose iyo Horumarinta Reer Miyiga

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
Ministry of Interior Affairs, Local Government & Rural Development

# Maamulka Shaqaalaha Dawladaha Hoose



# *HRM 3:*

# *MEERTO NOLOLEEDKA MAAMULKA SHAQAALAHA*

## BUUGGA KAQAYBGALAHA (QABYO-QORAAL)

**November 2017**

SUPPORT PROVIDED BY UNITED NATIONS SOMALIA

***QABYO-QORAAL***

## Tusmada Buugga

Hordhac........................................................................... **Error! Bookmark not defined.**

Bilawga........................................................................... **Error! Bookmark not defined.**

Guudmarka meerta nololeedka maamulka shaqaalaha iyo Xaaladaha Shaqada ee Iskumidka ah (UcoS)........................................................................... **Error! Bookmark not defined.**

Caafimaadka Iyo Badbaadada Goobaha Shaqada Dhexdooda.............................................. 14

Siyaasadda Jinsiga —Shaqaalaynta........................................... **Error! Bookmark not defined.**

Beddelka, dalacsiinta, hoos u celinta........................................ **Error! Bookmark not defined.**

Anshax Marinta Iyo Cayrinta.................................................... **Error! Bookmark not defined.**

Shaqo ka fariisin........................................................................ **Error! Bookmark not defined.**

Qorshaha Hawsha..................................................................... **Error! Bookmark not defined.**

Gunaanad.................................................................................. **Error! Bookmark not defined.**

Eray bixin.................................................................................. **Error! Bookmark not defined.**

Ilo............................................................................................. **Error! Bookmark not defined.**

## Mahadnaq

Wasiirku wuxuu u mahadcelinayaa UNDP/JPLG caawimaadooda sameynta/ diyaarinta buugaagta hagayaasha Maareynta kheyraadka dadka (HRM Manuals), sidoo kale wasiirku wuxuu u mahadnaqayaa la taliyahaha UNDP/JPLG Marwo Rabecca oo dadaalkeeda iyo kartideeda la'aantood aan howshaani (HRM) suurtagal noqoteen, sidaa si la mid ah wuxuu wasiirku Mahad u jeedinayaa la taliyaasha degmooyinka iyo agaasimayaasha waaxaha maamulka iyo maaliyadda qeybtii libaax ay ka qaateen dib u eegista buugaantaan hagayaasha (HRM) ugu danbeyn wasiirku wuxuu u mahadcelinayaa kooxdii Wasaaradda ee dib u eegista oo kala ahaa: Mohamed Ali Nor (Agaasimahii hore Qorsheynta) Maxamed Yuusuf Muuse ( La taliye farsmo ee qorsheynta), iyo Cabdulkadir Nuur Cilmi ( La taliye farsmo ee dowladaha hoose), wadashaqeyntoodii iyo gacantii ay ka geysteen dib u eegista iyo tafaf tiriradda buugaagta Maareynta kheyraadka dadka ee dowladaha hoose ( Local government HRM).

Waxaa mar labaad wasiirku u mahad celinayaa UNDP/JPLG taagaradooda wax ku oolka aheyd ee tarjumidda buugaagta maareynta kheyraadka dadka ee dowladaha hoose (HRM).

**Mahadsanidiin.**

Cabdullahi Cali Xirsi (Timacade)

Wasiirka, Wasaaradda Arimaha Gudaha, Dowladaha Hoose iyo Hurumarinta Reer Miyiga.

| DOWLADDA PUNTLAND<br>EE SOOMAALIYEED<br><br>Wasaaradda Arrimaha Gudaha,<br>D/Hoose iyo Horumarinta R/Miyiga | | حكومة ولاية بونتلاند<br>الصومال<br><br>الرعوية وزارة الداخلية والحكومات<br>المحلية والتنمية |
|---|---|---|
| Ministry of Interior, Local Governments & Rural Development | | |

| Xafiiska Wasiirka | Bossaso | مكتب الوزير |
|---|---|---|

***REF:*** ***XW/WAG/DH/HRM/ 113/17*** ***DATE:*** **31- Oct - 2017**

**Ku: Degmooyinka Puntland.**

**Og: Dhamaan Daneeyayaasha Horumarinta Dowladaha Hoose.**

**Ujeedo: Dhaqangalinta iyo ku Shaqaynta Nidaamka Maareynta Shaqada iyo Shaqaalaha.**

Waxaa lafarayaa dhamaan dowladaha hoose ee Puntland in ay dhaqangaliyaan isla-markasna ay ku shaqeeyaan nidaamkan uu idin barayo hagaha Maareeynta Shaqada iyo Shaqaalaha ee loo yaqaan (Human Resource Management HRMI). Nidaamkaan oo waxbadan ka tari doona kor u qaadidda Qaabka shaqaaleysiinta , qiimeynta, dalacsiinta iyo hoos u dhigidda shaqaalaha dowladaha hoose ,si loo helo shaqaale tayo leh oo ka soo dhalaali kara shaqooyinka ay u hayaan dowladdaha hoose iyo mumaadiniinta degmooyinka dowladda Puntland.

Wasiirku wuxuu magacaabi doonaa guddi dabagal iyo qiimeyn ku sameyn doona sida aad u dabakhdaan uguna dhaqantaan hagayaasha Maareynta Shaqada iyo Shaqaalaha (HRM) ka dib marka si fiican la idiinku tababaro macluumaadka hagayaashani xanbaarsanyihiin, gudigaan dabagalka iyo qiimeyntu warbixinta ay soo saaraan waxaa lagu muteysan doonaa abaal marin ama ciqaab hadba kii ay degmado u qalanto

Hadaba waxaa marlabaad la farayaa in ay degmooyinku u dhaqangaliyaan si rasmi ah nidaamkan sida ugu hufan uguna macquulsan si degmooyinka shaqaalaheedu ay u noqdaan kuwo tayo leh isala markaasna bixin kara adeegyada iyo guud ahaan shaqooyinka loo igmaday.

**Fulin Wacan.**

**Fulin Wacan.**

~~Cabdulahi~~ Cali Xirsi (Timacade)

Wasiirka Wasaaradda Arimaha Gudaha, Dowladaha Hoose iyo Horumarinta Reer Miyiga.

WASIIRKA WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA & HORMARINTA REER MIYIGA
XAFIISKA WASIIRKA
MINISTER OFFICE

_______________________________

## Erayada la soogaagaabiyay ee la isticmaalay

| | |
|---|---|
| HR | Shaqaale |
| HRM | Maamulka Shaqaalaha |
| MILGRD | Wasaaradd Arrimaha Gudaha,D/ Hoose iyo Horumarinta Reer Miyiga |
| OH&S | Caafimaadka iyo badbaadada Goobta Shaqada |
| UCoS | Xalaadaha Shaqada ee Iskumidka ah |

# Hordhac

## Ujeedooyinka iyo Abbaaraha

### *Ujeedada guud ee barnaamijka tababarka ku saabsan maamulka shaqaalaha*

Ujeedada barnaamijka tababarka shaqaalaha dawladaha hoose ee Puntland waa in gacan laga siiyo fahamka iyo dabaqaadda habraacyada ku xusan Buugga Maaraynta Shaqaalaha ee hadda la qoray ee Dowlad Goboleedka Puntland, si loo hubiyo in shuruucda shaqaalaynta ee dawladda hoose yihiin qaar si saxa oo joogto ah loo raaco.

Ujeedada guud ee laga leeyahay hagaajinta maaraynta habraacyada maaraynta shaqaalaha ee degmooyinku waa in ay u suuro galiso maamulada degmooyinka *in ay si wanaagsan u gutaan waajibaadka saaran si wax ku ool ahna u gaarsiiyaan adeegyada dadka*.

### *Ujeedooyinka gaarka ah ee tababarka*

Dhammaadka qayba HRM 3 ee tababarka, ka qaybgalayaashu waa inay awoodaan:

- In ay dejiyaan Shuruudaha Guud Ee Adeegga Iyo Kuwa Fasaxa sida ku dhigan Hagaha Jeebka.
- In la sameeyo habraacyada saxda ah ee dhacdooyinka meerto nololeedka shaqaalaha sida dalacsiinta/hoos u celinta, iyo shaqo ka.
- In la sameeyo habraacyada anshax marinta iyada oo loo eegayo darnida xad gudubka hab waafaqsan buugga shaqaalaha.
- In ay diyaariyaan liiska hubinta ee OH&S kaasoo loo samaynayo goobta shaqada, lana waafajinayo xaalada hadba ka jirta.
- In waxyaalo laga fuliyo Qorshaha hawlgalka ee jinsiga, si kor loogu qaado fursada haweenka ee dhanka shaqada iyada oo sidaanna ay yeelana golaha degaanku.

### *Waxyaalaha laga filayo in ay tababarka ka soo baxaan*

Natiijadda laga filayo barnaamijka tababrka shaqaaluhu waa in ka qaybgaluhu dareemo:

- Xiiso uu u qabo inuu dhaqangaliyo wixii ay ka barteen habraacyada cusub ee maamulka shaqaalaha.
- Kalsooni ay ku qabaan fahamkooda dhanka habraacyada cusub ee maamulka shaqaalaha iyo awoodda ay ku dabaqi karaanba.
- Xamaasad ku aaddan sida habraacyada shaqaalaha ee cusubi ay gacan uga siin karaan degmadoodu inay adeegyo wanaagsan u qabato bulshadooda.

## Cidda ka qaybgali karta

Tababarka waxa loogu talagalay kooxahan soo socda:

- Dhammaan shaqaalaha degmada ee ku shaqada leh hawlaha shaqaalaha, sida saraakiisha u qaabilsan shaqaalaha.
- Shaqaalaha kale ee ay khusayso, sida tusaale ahaan Waaxda Maamulka iyo Lacagta.
- Xubnaha gudida shaqaalaha, oo ay ku jiraan: maayarada, Xoghayayaasha Fulinta ee Dawladaha Hoose iyo  Agaasimayaasha Waaxaha Degmada.

Nuskhad kooban oo qaybtan ah ayaa loo diyaarin doonaa kooxaha kale sida:

- Xubnaha Golaha Degaanka.
- Wakiilada Wasaaradd Arrimaha Gudaha,D/ Hoose iyo Horumarinta Reer Miyiga / dowladda dhexe.

## Guudmarka waxyaalaha lagu baranayo tabobarka HRM

| Qaybta | Qayabaha khuseeya ee buugga HRM |
|---|---|
| HRM 1. Hordhaca maamulka shaqaalaha | 1. Hordhac<br>2. Doorarka iyo shaqooqinka waaxda maamulka shaqaalaha |
| HRM 2. Shaqaalaynta iyo magacaabista | 7. Shaqaalynta |
| HRM 3. Meerta nololeedka maamulka shaqaalaha | 5. Shuruudaha guud ee shaqada/adeegga<br>6. Caafimaadka iyo Badbaadada<br>8. Wareejinta, dalacsiinta, hoos u-celinta iyo anshax marinta<br>9. Shaqo ka fadhiisinta<br>11. Fasax |
| HRM 4. Miisaaniyadda shaqaalaha iyo maamulka mushaharooyinka | 3. Qorshaynt iyo miisaaniyad u samaynta shaqaalaha<br>4. Maamulka mushahaarooyinka |
| HRM 5. Shaqooyinka sare ee maamulka shaqaalaha | 10. Maaraynta Waxqabadka<br>12. Tababarka iyo Horumarinta |
| Qaybaha la kala dooran karo *(waa laga talobixin doonaa)* | Xidhiidhka xafiiska dhexdiisa<br>Samaynta iyo joogtaynta nidaam kayd<br>Diyaarinta CV wax ku ool ah |

## Erey bixinta iyo ilaha

- Waxa jira **Eray-bixin** ku saabsan erayada iyo macnahooda taasoo ku jirta xagga dambe ee buugga ka qayb galaha.
- Waxa aad arki doontaa liis koobsanaya **Ilaha** muhiim ah oo koobsaday xog dheeri ah kaasoo ku jira xagga dambe ee buugga.

## Wakhtiga & Hababka

Tababarka maamulka shaqaalaha ee HRM 3 waxa loo qaabeeyey in uu noqdo tababar **Hal maalin ah.** Tababarku waxa uu isku dayayaa in uu noqdo mid laga wada qayb galo oo isdhex gal abuura. Marka lagu daro casharada la soo jeedinayo iyo bandhigyada, hababkan soo socda ayaa iyana sidoo kale la adeegsan doona:

- Doodo iyo isla falanqayn kooxaha dhexdooda ah
- Laylis wadareedyo
- Su'aalo maskax-maalis ah
- Su'aalo dibu eegis ah
- Qorshayaal hawlgal

## Guudmarka tababarka

| Kulan | Waxa la bartay? |
|---|---|
| **Bilaw** | • Soodhawayn iyo Isbarasho<br>• Ujeedooyinka iyo Abbaaraha<br>• Filashooyinka iyo Xeerarka |
| **Kulanka 1aad: Guudmar iyo UCoS** | • Heerarka meertada maamulka shaqaalaha<br>• Shuruudaha Guud ee Shaqada |
| **Kulanka 2: Caafimaadka iyo Badbaadada** | • Liiska hubinta ee OH&S<br>• Arrimaha la xiriira Caafimaadka iyo Badbaadada goobaha shaqada |
| **Kulanka 3: Siyaasadda jinsiga —shaqaalaynta** | • Qorshaha Hawlgalka ee Jinsiga<br>• Goobo shaqo oo dad kala duwan kawada hawlgalaan |
| **Kulanka 4: Beddelka, dalacsiinta, iyo hoos u-celinta** | • Maamulka beddelka iyo dalacsiinaha |
| **Kulanka 5: Anshax marinta iyo shaqo ka caydhinta** | • Noocyada xadgudubyada iyo ciqaabaha<br>• Habraacyada tallaabooyinka anshax marinta |
| **Kulanka 6: Shaqo kafadhiisinta** | • Habraacyada maaraynta shaqo ka fadhiisinta |
| **Gebogebo** | • gundhig<br>• qorshe hawlgal<br>• hawsha qiimaynta<br>• qiimayn |

**Kulanka isbarashada**

# Bilawga

*Ujeedooyinka Kulanka:*

- Abuur jawi waxbarasho oo raaxo leh isla markaana waxbarashada dhiirigalinaya.
- Bixi guudmar ku saabsan tababarka, kaasoo ay ku jirto ujeedooyinka iyo abbaaruhu.
- Fahan waxa ka qaybgalayaashu filanayan.
- Deji xeerar kulanada lagu maamulo oo la isku raacsanyahay.
- .

! Kulankan waxa aad ku baran doontaa tababarahaaga iyo ka qaybgalayaaha kale. Waxa aad ogaan doontaa waxa tababarku ku saabsanyahay iyo waxa lagaa filayo in aad samayso.

Waa kuwan qaar ka mid ah arrimaha macalinku kaga hadli doono kulankan:

- Soo dhawayn, isbarasho iyo nimaadka goobta
- Ujeedooyinka iyo abbaaraha tababarka
- Guudmar ku saabsan tababarka iyo jadwalka
- Filashooyinka iyo xeerarka

**Su'aalo ibo fur ah:**

Si kooban isula falanqeeya qofka aad wadafadhidaan arrimahan soo socda:

- Maxaad ka **filaysaa** tababarkan?
- Maxaad is leedahay waad ku **kordhin** kartaa tababarkan?

- Sheeg qaar ka mid ah **arrimaha udub dhexaadka u ah maamula shaqaalaha** (kuwa hoos ku taxan) ee muhiimka u ah tababarkan ku saabsan meerto nololeedka maamulka shaqaalaha?

Soo jeedin: ku dar wakhti lagu falanqayn karo iyo ama xaashi xaqiiqooyinka lagu urursho taasoo ku saabsan qiimaha uu u leeyahay buugga maamulka shaqaaluhu shaqaalaha guud ahaan, si meesha aad uga saarto walaacyada ku saabsan jagada, mushaharka, shuruudaha. ( sarkaal sare sida wasiir ayay tahay in uu arrintan hago?) tusaale ahaan, miyay tahay in qofkastaa dib usoo codsado jagadiisa? mushahaaradooda iyo gunnooyinka kale mala dhimi doonaa?

## Shaqooyinka Aasaasiga Ah Ee Golayaasha Degaanka Ee Dhanka Maaraynta Shaqaalaha

a. Abuur oo joogtee fayl gaar ah oo qof waliba yeesho.
b. Samee xayaysiisyo, fursado waraysi, imtixaan ay galaan dhammaan dadka shaqada rabaa iyada oo uu ka qayb galayo xoghayaha fulintu.
c. Qor waraaqo aad ku magacaabayso iyo qaar hubineed adiga oo la kaashanaya xoghayaha fulinta.
d. Diyaari oo maaree diiwaan.
e. Maaree diiwaanka billeha ah ee shaqaalaha.
f. Diyaari oo saxeex mushahaarooyinka.
g. Maaree isbeddelada mushahaarooyinka.
h. U gudbi dhokumentiyada kore madaxda waaxaha ay khusayso (tusaale, agaasimaha maaliyadda ama xoghayaha fulinta) gudbina warqad uu saxeexo madaxa waaxdu iyada oo ku xiran hadba sida ay taasi muhiim u tahay.
i. Dhamaystir mushaharka la ansixiyay si loogu gudbiyo waaxda maaliyadda iyo qaybaha kale ee ka masuulka ah.
j. Hubi in dhammaan dokumentiyada ku saabsan mushahaarooyinka la fayl gareeyey.
k. Hubi in foomamka mushahaarooyinka bisha dambe la daabacay, la qaybiyay iyada oo lala kaashanayo sarkaalka mushahaarooyinka.
l. Maaree buuxinta iyo xafidida nuqul warqad ah oo ku saabsan xogta mushahaarooyinka.
m. Ilaali qandaraasyada shaqaalaha.
n. Isku dubbarid oo gacan sii dacwadaha la xiriira anshaxa iyo tallaabooyinka laga qaadayo wixii soobaxa.
o. Maamulka fasaxyada.
p. Maamulka hawlgabka.

*isha:: buugga maamulka shaqaalaha Dawladaha hoose ,Puntland, 2.3.1*

### Xiriirka buugga shaqaalaha

Hadaad rabto macluumaad badan, eeg buugaaga shaqaalaha:

**Kulanka 1**


# Guudmarka meerta nololeedka maamulka shaqaalaha iyo Xaaladaha Shaqada ee Iskumidka ah (UCoS)

*Ujeeodoyinka kulanka*

Gebogabada kulankan, ka qaybgalayaashu waxa ay awoodi doonaan in ay:

- Soocaan heerarka muhuumka ah ee meerto nololeedka maamulka shaqaalaha.
- hirgalinta shuruudaha guud ee adeegga ee dhammaan shaqaalaha golayaasha degaanka.

## Jaantuska 1: 'Meerto nololeedka' Maamulka Shaqaalaha




Qaybaha shaqaalaynta iyo magacaabista ee meertadamaamulka shaqaalaha qaybaha khuseeya ayaa lagaga hadlayn qayb gaar ah **HRM 2 Shaqaalaynta iyo magacaabista**

'Beddelka, dalacsiinta/hoosucelinta iyo eriga' qaybaha khuseeya ee meertada HRM ka waxa lagagahadlay si faahfaahsan ***Qaybta 4, 5, iyo 6*** ee qaybtan.

*QABYO-QORAAL*

## Hafto bixinta shaqaalaha —shuruudaha guud ee adeegga (UCoS)

- Marka xubin shaqaale oo cusubi bilawdo jago cusub, waa in la baro. Hafto bixintaa waxa ka mid noqonaysa in xog sugan laga siiyo shuruudaha guud ee shaqada, kuwaasoo ku jira buugga shaqaalaha, Qaybta 5. shuruudaha guud ee adeegga iyo qaybta 11. fasaxyada.
- Xogtan waxa lagu soo ururshay **hagaha jeebka lagu qaato**, si hab dhakhso ah loogu adeegsan karo tixraac ahaan.
- hafto bixintu waa in ay sidoo kale bixisaa xog badbaadada goobaha shaqada, iyo siyaadaha jinsiga ee dhanka shaqaalaynta . kuwan waxa loogaga hadlay si faahfaafsan ***Kulanka 2 iyo 3***.

### Xiriirka buugga shaqaalaha

xog dheeri ah, ka eeg buugga shaqaalaha:


**5. shuruudaha guud ee shaqada 11. fasaxa**

## Layli 3.1: hirgalinta shuruuda guud ee adeegga ee degmadaada

Layligan waxa loo qaabeeyey in uu ku baro shuruudaha guud ee adeegga iyo shuruudaha fasaxa ee goobaha shaqada ee golaha degaanka, iyo in uu kugu dhiirigaliyo in aad ka fakarto tallaabooyinka aad qaadi karto si aad uga hirgaliso shuruudahan goobtaada shaqada.

Waxa aad la shaqayn doontaa koox si aad u wada akhridaan Hagaha Jeebka una samaysaan waxyaalahan soo socda:

- Sooc liiska 10 arrimood ee ay kooxdaadu u malaynayso in ay muhiim u yihiin in shaqaaluhu ogaado iyo sababta aad sidaa ugu malaynayso.
- Golaha dhexdiisa, liisaska ayaa laysu gayn doonaa iyada oo lahormaynayo. Intaa kadib kooxdaada waxa loo qoondayn doonaa hal qodob oo ay eegto waxaana la fari doonaa inay si si koobaan u soo bandhigto, waxaana ku jiri doonaa:
    - Gundhigga qodobka.
    - Fikrad ku saabsan sida qodobkani ula mid yahay ama uga duwanyahay waxa hadda ka dhaca degmadaada.
    - Sida qodobkan loo hi... ...daada.



## Dib-u eegis iyo Tallaabo

- Kulankan waxa lagu soo bandhigay meerto nololeedka mamulka shaqaalaha iyada oo isla markaana si faahfaahsan loogu eegay hal dhinac—shuruudaha guud ee adeegga iyo kuwa fasaxa ee ay tahay in dhammaana shaqaaluhu ka warqabaan inta ay ku jiraan hafto baxa.
- Marka laga fiiriyo macnaha tani u leedahay dhanka goobta shaqada, waxa ay masuuliyadda hirgalinta shuruudaha guud ee shaqada ee golayaashooda degaanku saarantahay sarkaalka u qaabilsan maamulka shaqaalaha iyo saraakiisha kale ee doorarka sarsare leh sida Duqa, Xoghayaha fulinta iyo agaasimayaasha waaxaha.
- Gebagabada buuggan ka qaygalaha, waxa jira qorshe hawlgal ee tallaabo dheeri ah looga qaadi karo goobaha shaqada. Wixii aad ku baratay kulankan adigoo adeegsanaya, qorshahaa hawlgalka ku qor wax ku saabsan sida hore loogu sii socon karo dhanka hirgalinta shuruudaha guud ee shaqada ee goobtaada shaqada. Tusaale ayaa lagu siiyay

**Kulanka 2**

# Caafimaadka Iyo Badbaadada Goobaha Shaqada Dhexdooda

## Ujeedooyinka kulanka

Gebogeboda kulankan, ka qaybgalayaashu waxa ay awood u yeelan doonaan inay:

- Falanqeeyaan muhiimadda qorshaha caafimaadka iyo badbaadada ee goobta shaqada.
- Dejiyaan hagayaal dhanka caafimaadka iyo badbaadada ah iyo liis hubineed ee uu yeesho goobta shaqada ee degmadoodu iyaga oo adeegsanaya foomka khuseeya ee ku jira buugga shaqaalaha.

## Su'aalo laga doodayo

- Goobta shaqada ee golahaaga degaanku ma leedahay qorshe u dejisan dhanka caafimaadka iyo badbaadada? miyuu jiraa sarkaal u qaabilsan caafimaadka iyo badbaadada golaha degaanka?
- Arrimaha la xidhiidha caafimaadka iyo badbaadada inta badan isha ayaa laga laliyaa goobaha shaqada dhexdooda, inkasta oo ay aad muhiim u yihiin hadana. maxaad u malaynaysaa sababta, maxayse kula tahay in la samayn karo si kor loogu qaado wacyiga arrinta ku saabsan ee shaqaalaha dhexdooda?
- Maxay yihiin arrimaha arrimaha muhiimka ah ee laxidhiidha caafimaadka ee soo waajaha shaqaalaha degmada? Taageero noocee ah ayay tahay in shaqaalaha laga

## Qodobo muhiim ah oo ku saabsan badbaadada iyo caafimaadka dhanka shaqada

- Dhammaan golayaasha degaanku waa in ay dejistaan hagayaashooda dhanka caafimaadka iyo badbaadada, iyaga oo ka duulaya Qodobka 33 ee xeerka shaqaalaha dawladaha hoose.
- Golaha degaanku waa inay magacaabaan sarkaal u qaabilsan isku dubbaridka arrimaha caafimaadka iyo badbaadada, marka lagu daro hawl... xilsaaranyahay. waxa ku jira arrimahan:
  - in afartii biloodba mar la eego dhismaha golaha
  - in la dejiyo qorshayaal caafimaad iyo qaar badbaado
  - in la uruuriyo rikoodhada kusaabsan waxyaalaha kormeerkaas
  - in la rikoodh gareeyo dhacdooyinka
  - hubinta in si haboon loo rakibo qalabka
  - dhig qalab dabdemis, iyo agabka gargaarka degdegaah.
- Arrimaha la xidhiidha caafiimaadka ee looga hadlay buugga shaqaalaha waxa ka mid ah cabidda sigaarga iyo qaadka aalkulo iyo daroogo (6.5); HIV/AIDS iyo cudurka qaaxada/dhax... caafimaadka dhimirka (6.10).

## Xiriirka buugga shaqaalaha

Xog dheeri ah, ka eeg buugga shaqaalaha:

**6.1 shuruucda caafimaadka iyo badbaadada**

**6.2 tilmaamaha caafimaadka goobta shaqada iy badbaadada**

**6.3 caafimaadka goobta**

## Layliga 3.2: u same liis hubineed arrimaha caafimaadka iyo badbaadada

Layligan waxa aad ku barandoontaa qaabka liiska hubinta caafimaadka iyo badbaadada, waxaanad waafajin doontaa baahiyaha ka jira goobaha shaqada ee degmadaada.

Kooxdaada dhexdeeda, eeg liiska hubinta ee lagugu siiyay ***xaashida layliga 1*** ee hoose waxaanad la tacaashaa arrimahan:

- suuragal matahay in laga arko liiska waxyaalo golaha degaanku si wanaagsan u qabto [O], ama u baahan in tallaabo laga qaado [X]?
- ma jireen waxaad ku dari karto ama waxka beddel ku samayn karo liiskan, si

**Warqadda 1 ee layliga: liiska caafimaadka iyo badbaadada** (eeg **lifaaqa 7** ee buugga maamulka shaqaalaha )

### Liiska hubinta badbaadada iyo caafimaad qabka xafiisyada

***Tusaalahani mawada koobayo dhammana arrimaha suuragalka ah ee khuseeya caafimaadka iyo badbaadada xafiisyada hubintdooda. Liiska ugu wanaagsani waa ka dhab ahaan uga turjumaya baahiyahaaga gaarka ah.***

| **Kormeerayaasha:** | **Taariikhda:** | | |
|---|---|---|---|
| | (O) lagu qanci karo<br>(X) u baahan tallaabo in laga qaado | | |
| | Goobta | Xaaladda | Faallo |
| **Boodhadhka warka iyo calaamadaha** | | | |
| Ma yihiin qaar nadiif ah oo la akrin karo? | | | |
| Si joogto ah waxka beddel maloogu sameeyaa agabka? | | | |
| **Dhulka** | | | |
| Ma jiraan wax kala daadsani, xashiish, roog dhammaaday? | | | |
| Dhulku ma yahay mid lagu silbanayo, saliid leh ama qoyan? | | | |
| **Jaranjarooyinka iyo meelaha la maro** | | | |
| Ma jiraan wax xanibaad ah oo taallaa? | | | |
| Jaranjarooyinku iftiin mayihiin? | | | |

| | | | |
|---|---|---|---|
| Meelo la qabsan karo ma leedahay? | | | |
| Meelaha la marayaa ma yihiin qaar ka nadiif ah bakhaaro iyo waxyaalo kale? | | | |
| **Qalabka** | | | |
| Gaadh, muraayado iyo qalab codka yarayn karaa ma jiraan mana yihin qaar shaqaynaya? | | | |
| Farnijarku ma yahay mid lagu badbaadayo hadii la adeegsado? | | | |
| - kuraastu ma gabawday ama ma yihiin qaar aan si wanaagsan loo samayn | | | |
| - miisaska iyo kabadhadu ma leeyihiiin filginno soo taagan | | | |
| - iskusoo xoon | | | |
| Salaamada iyo meelaha laga baxayaa ma yihiin qaar la dayactiro oo wanaagsan? | | | |
| **Qalabka xaaladaha degdega ah** | | | |
| Qalab dabdemis mala dhigay dhammaan dhismayaasha iyo dabaqyada oo dhan? | | | |
| Shaqaaluhu maku tababaran yihiin sida loo adeegsado qalabka dabdamiska? | | | |
| Dhammaan qalabka xakamaynta dabku ma yahay mid si joogto ah loo hubiyo xaaladdiisuna wanaagsantahay? | | | |
| Qalabka xakamaynta dabku ma yihiin kuwo ku habboon nooca dabka ee ay tahay in laxakameeyo? | | | |
| **Habraaca daadguraynta ee dhismayaasha** | | | |
| Habraac loo maro daadguraynta dhismayaashu ma dajisan yahay? | | | |
| Meelaha laga baxo dhismayaashu si cad maw astaysanyihiin? | | | |
| Meesha dadka laysugu soo uruurinayaa ma tahay mid si cad u astaysan? | | | |
| Tababar dhanka dabka ah ma laqabtaa ugu yaraan sadexdii biloodba mar? | | | |
| Dad ka shaqeeya dab demiska oo la carbiyay ma jiraan? | | | |

| | | | |
|---|---|---|---|
| **Dhismaha** | | | |
| Hubi dhismayaashan si aad u hubiso badbaadada: | | | |
| - albaadada balaqma | | | |
| - meelaha furan dhulka iyo gidaarada | | | |
| - salaamada, jaranjarooyinka iyo meelaha la cuskado | | | |
| - meelaha la cuskado | | | |
| Alaabaha si fiican meel ma loogu keydiyay? | | | |
| **Walxaha halista ah** | | | |
| Majiraan walxo halis ah –baatrool, gaas, xaabo | | | |
| - hadiijawaabtu haa tahay, walxahaasi ma yihiin qaar si wanaagsan u calaamdsan? | | | |
| -hadii jawaabtu haa tahay, ma ladhigay meel halista ka soo gaadhi karta shaqaalaha yarayn karta? | | | |
| - haddii jawaabtu haa tahay, shaqaaluhu ma ku tababaranyahay sida si wanaagsan loogula macaamilo? | | | |
| **Nadaafadda** | | | |
| Musqulaha iyo meelaha cuntada lagu diyaariyaa ma yihiin qaar nadiif ah? | | | |
| Kuwan soo socda waxku dabooli kara baahiyaha Malaga haystaa? | | | |
| - musqulaha | | | |
| - jalxadaha biyaha | | | |
| -goobaha wax lagu cuno | | | |
| Ma dejisanyihiin tallaabooyin looga hortagayo faafidda cudurada? | | | |
| **Amniga** | | | |
| Habraaca bixidda iyo geliddu ma yihiin qaar sugaya amniga shaqaalaha maalintii iyo habeenkiiba? | | | |
| Habraacyadii xaaladaha degdega ah sida daadguraynta, dabka, hanjabaadaha miinoyinka, qof hanjabaya,iwm ma yihiin qaar dejisan? | | | |
| **Iftiinka** | | | |

| | | | |
|---|---|---|---|
| Majiraan laambado maqani? | | | |
| Meelo madoobi majiraan? | | | |
| **Keydka alaabaha** | | | |
| Alaabtu ma u rasaysan tahay si wanaagsan oo nabadgalyada ilaalinaysa? | | | |
| Majiraan waxyaalo lagu talagalay in lagu istaago marka la rasaynayo alaabaha? | | | |
| Khaanadaha wax la saara ma yihiin qaar la buux dhaafiyay? | | | |
| Walxaha waawayn ee culus ma la dhigay khaanadaha hoose? | | | |
| Marinada iyo goobaha shaqadu ma yihiin qaar aanay waxba oolin? | | | |
| **Arrimo guud** | | | |
| Dab-qaybisooyin badan ma la adeegsaday? xadhkuhu ma yihiin qaar ilaashan? | | | |
| Xadhkaha dabka iyo kuwa teleefanadu mayhiin qaar baylahsan meelaha shaqaaluhu socsocdaan? | | | |
| Mishiinada dabka iyo kuwa kaleba ma yihiin qaar xeero ku jira? | | | |
| Xadhkaha dabku ma yihiin qaar si wanaagsan u dahaadhan? | | | |
| Majiraan qalabo filginno ka soo taagan lihi? | | | |
| Waxyaalaha haya gidaarada iyo siliigga sare ma yihiin qaar si wanaagsan u xidhan ? | | | |
| Waraaqaha iyo waxyaalaha qashinka ahi ma yihiin qaar si haboon loo qubo? | | | |
| Khaanada iyo kabadhada faylashu ma yihiin qaar xidhan marka aan la adeegsanayn? | | | |
| Qalabada xafiisku ma yihiin qaar meel ay ku badbaadayaan yaalla? | | | |
| Agabku ma ku jiraan kabadho ama miis dushii ma ku rasaysan yihiin? | | | |
| Kabadhada iyo khaanaduhu mayihiin qaar la buux dhaafiyay? | | | |

| | | | |
|---|---|---|---|
| Kabadhada faylashu ma yihiin qaar loo habeeyey in kuwa ugu culus hoosta la mariyo? | | | |
| Kuraasta loo fuulo marka wax la rasaynayo iyo waxyaalaha xashiishka lagu uruuriyaa miyay yaalaan meelo lagu turaanturoon karo? | | | |
| **Gargaarka degdega ah iyo caafimaadka** | | | |
| Qalabkii gargaarka degadegu ma yaalaan dhammaan waaxaha? | | | |
| Shaqaalaha qaar ka mid ahi maku tababaranyihiin gargaarka degdega ah iyo la tacaalidda dhaawacyada fudud? | | | |
| Ma jiraan habraacyo loo marayo shilalka goobaha shaqada–dhooli iyo teleefanada goobaha caafimaadka? | | | |

## Dib-u eegis iyo Talaabo

- Sida aynu soo falanqaynay, tixgelinta caafimaadka iyo badbaadu waa muhiim, laakiin inta badan marka laga hadlayo waxtarka ay u leeyihiin goobta shaqada waa ladhayalsadaa.
- Muhiim ayay u noqon doontaa shaqaalaha sarsare inay maareeyaan geedisocodka ayna hubiyaan in tilmaamayasha caafimaadka iyo bedbaadada loo hogaansamo. Goobshaqo oo aan bedqabid iyo bedbaado toonna lahayni waxa ay keentaa shaqo kahabsaan farobadan, kaasoo ka tarjumaya hoos u dhac kuyimaad guud ahaanba waxsoosaarka goobta shaqada.
- Dhamaadka buugga kaqaybgalaha waxaa ku qoran Qorshe Waxqabad si talaabooyin dheeri ah looga qaado goobta shaqada. Adiga oo wixii aad kulankan ku baratay ku biiri Qorshahaaga Waxqabad ee ku saabsan sidii loogu talaabsan lahaa fulinta buugga HRM ee goobtaada shaqada. Tusaale ayaa halkan hoose lagugu siiyay:
    - *Magacaw iskudubaridaha OH&S Golaha Degmada, kalana shaqee sidii liiska hubinta loo waafajin lahaa baahiyaha caafimaad iyo kuwa badbaado ee goobta. Hubi in ay helaan wakhti iyo fursad ku filan oo ay ku gutaan waajibaadka dheeriga ah*

**Kulanka 3**

# Siyaasadda Jinsiga —Shaqaalaynta

## Ujeedooyinka kulanka

Gebogabada kulankan, ka qaybgalayaashu waxa ay awoodi doonaan inay:

- Aqoonsadaad arrimo dhanka jinsiga la xidhiidh oo khuseeya dhanka shaqaalaynta oo ka soo wajaha dumarka goobaha shaqada.
- In la sooco tallaabooyinka laga hirgalinayo goobaha shaqada si loo gaaro abbaaraha siyaasadeed ee jinsiga iyo mabaadida haygaysa jinsiga marka la fiiriyo dhanka shaqaalaynta haweenka Puntland dhexdeeda.

Kala munaaqash tani Toril iyada oo aan ka jirin siyaasad la mid ah PLD.

## Su'aalo la isla falanqaynayo

- Siyaasadda qaran ee shaqaalayntu waxa ay sheegaysaa abuuridda degaan haboon si dhammaan dadka ka qayb galayaa ay ugu raaxaystaan shaqo waxtar leh dhammaan qaybaha horumarka. waa maxay macnaha ay kuu leedahay "deegaan haboon' adoga ? ilaa xadkee ayaa goobtaada shaqadu haatan tahay mid haboon?
- Maxaa ka mid ah faa'iidooyinka in la helo goob dad kala gedisani ka hawlgalaan taasoo gacan siinta karta dumar iyo ragba?

## Layliga 3.3: Xaalado kusaabsan siyaasadda jinsiga (gender)

Layligan waxa loogu talagalay in lagugu baro siyaasadda ku saabsan jinsiga ee dhanka shaqada Puntland dhexdeeda waxaanu layligani kugu hogaamin doonaa in aan ka fakarto noocyada tallaabooyinka la qaadi karo goobaha shaqada dhexdooda si looga dhigo golayaasha degmooyinka dhexdooma meelo lagu simanyahay oo haboon marka la eego arrimaha jinsiga (gender).

Adiga oo koox ka mid ah, akhri siyaasadda jinsiga waxaanad u fiirsataa xaaladdaha ku jira ***xaashida layliga 2***, kuwaasoo ku salaysan siyaasadaha ... a shaqada iyada oolaga soo xiganayo siyaasadda qaran ee jins... a




QA...

## Yoolalka iyo Mabaadiida Siyaasadda Jinsiga ee Puntland—Shaqaalayn

**4: YOOLALKA SIYAASADAHA JINSIGA IYO MABAADI'DA HAGTA**

***4.4.6. Shaqaalaynta***

**Hordhac**

Dawladdu waxa ay abuuri doontaa jewi ku haboon una suuragalin kara haweenka, raga iyo qaybaha baylahsan ee bulshadu inay ka qayb galaan si inta kale la simanna uga faa'iidaystaan shaqo waxtar leh marka la fiiriyo dhammaan dhinacyada horumarka.

Dumarka yar ee ka shaqeeya shaqooyinka qaybta aan rasmiga ahayni waa qaar lacagyar la siiyo inta bandanna ay ku adagtahay in ay u gudbaan maamulka sare iyo go'aan qaadashada halka go'aamada dhaqaale ee noloshooda saameeya lagu qaato.

**Ujeedada**

In la hagaajiyo ka qaybgalka dumarka ee shaqooyinka guud ahaan, iyo in kor loo qaado heerka bulsho, kadhaqaale iyo ka siyaasadeed ee dumarka.

**Odhaahyo Siyaasadeed**

- In la hubiyo in si siman loo wadaago faa'iidooyinka horumarka dhaqaale raga iyo dumarka dhexdooda.
- In la kordhiyo lana kala duduwo fursadaha shaqo ee haweenka, gaar ahaan kuwa danyarta ah iyo kuwa aan xaasaska ahayn ee aan cidina u xilqabin noloshooda.
- In lahubiyo jiritaanka shuruuc dhawrsoonaan ah oo ay yeeshaan dhammaan noocyada shaqooyinku.
- In la hubiyo in mabda'a sinnaanta dhanka mushaharka ee shaqooyinka isku midka ah la hirgaliyo.
- in la cidhibtiro caadooyinka lagu takoorayo dumarka shaqeeya ee dhinacyda dalacsiinta, fursadaha tababarada iyo ka qaybgalka go aan qaadashooyinka .
- in loo doodo cidhibtirka kala takoorka raga iyo haweenka ee dhanka barashada xirfadaha, tababarada, deymanka, tignoolojiyada iyo suuqyada.

## Xaashida Layliga 2: Xaaladdo Ku Saabsan Siyaasadaha Jinsiga

***Xaaladda 1***

Xamdi waa gacanyare da' yar oo ka hawlgasha Golaha Degmada Abyan. Xamdi waxa ay shaqadan haysay muddo lix bilood ah waxaanay aragtay in gacanyarayaasha kale ee ay wada shaqeeyaan oo rag intooda badan loo diray tababar bilahan ugu dambeeyey, hase ahaatee iyada aan loo dooran in ay ka qaybgasho wax tababar ah. Xamdi waxa ay reer lahayd laba bilood waxaanay ka warwarsantahay in guurkeedu sabab uyahay tababar la'anteeda.

Marka la xulayo dadka loo dirayo tababarada, duqa golaha Abyan waligiiba ma doorto dumarka dada yar ee aan wali xaas noqon, waxaanu yidhaahdaa " maxay macno samaynaysaa in aan tababar u dirnaa, maalin dhawba way iska tagayaan oo xaas iyo caruur ayay yeelanayaane .'

***Su'aalo:***

- Sheeg odhaahda siyaasadeed ee xaaladani khusayso ?
- Maxaa ka dhalan kara fikirka caynkan ah ee laga qabo dumarka dada yare e goobaha shaqada? sidee wax looga qaban karaad?

***Xaaladda 2***

Fatima iyo Mohamed waa laba xirfadle oo da' yar oo heer khibradeed oo isku mid ah leh. Waxa ay wada codsadeen laba jago oo ah saraakiil diwaangalinta u qaabilsan golaha demada Abyan. Mohamed waxa la siiyay jagoheerkeedu yahay B7, fadumana waxa la siiyay jago heerkeedu yahay B10 (ka hoosaysa). Inkasta oo labada shaqaalaba qaban doonaan shaqo isku mid ah aqoon isku mid ahna way u leeyihiin shaqada, guddidii shaqaaluhu waxa ay dareemeen in mahamed nin yahay isla markaan leeyahay qoys da yar, sidaa daraadeedna uu u baahanayo mushahar ka sareeya ka faadumo, oo iyadu da yar xaasna aan ahayn.

***Su'aalo:***

- Odhaahda siyaasadeed ee arrintani xidhiidhka la leedahay waa tee?
- Maxay yihiin arrimaha ka dhalan kara dheelitir la'aantan dhanka mushaharka ah? sidee wax looga qabankaraa?

***Xaaladda 3***

Caasha waa sarkaalka u qaabilsan maamulka shaqaalaha ee degmada Abyan goleheeda degaanka. Inkasta oo iyadu door muhiim ah ku leedahay hab sami u socodka hawlaha degmada, hadana inta badan lalama tashado oo wax ma waydiiyaan xubnaha guddida shaqaaluhu marka ay qaadanayaan go'aamo la xidhiidha maamulka shaqaalaha. Caasha waxa ay dareemaysaa in aan afkaarteeda aad loo ixtiraamin in ay gabadh tahay awgeed. Buugga maamulka shaqaalaha (qaybtiisa 2.4) waxa uu sheegayaa in sarkaalka waaxda shaqaalaha shaqadiisu tahay:

> *…in uu tilmaan ka siiyo dhammaan waaxaha golaha degaanka qaab loo abuurayo jago, sida loo buuxinayo jago, sida loo soo dhawaynayo shaqaalaha cusub, sida loo maaraynayo waxqabadka, fasaxa, tababarka iyo horumarka, maaraynta anshax marinta, cabashada iyo shaqo ka cayrinta shaqaalaha. Sarkaalka maamulka shaqaaluhu waxa uu xaq u leeyahay in uu talo ka bixiyo dhammaan arrimaha la xidhiidha shaqaalaha ee ku jira buuggan, taladiisa hala raadsado ama yaan la raadsanne …*

***Su'aalo:***

- Siyaasadee ayay arrintani xidhiidh la leedahay?
- Maxay caasho samayn kartaa si ay u hubiso inay shaqadeedii qabsanaysanayso?
- Waa maxay soo-jeedimada aad u sameynayso Guddiga Shaqaalaha ee ku saabsan habkooda hadda ee go'aan-qaadashada?

## Dib-u eegid iyo Tallaabo

- Arrimaha shaqaalaynta ee la xidhiidha jinsigu waa qaar ahmiyad gaar ah u leh dawladaha hoose, kuwaasoo fursad u haysta in ay fursad siiyaan dumarka kana faa'iidaysan kara xirfaddooda iyo aqoontooda.
- Waxa muhiim ah in la dejiyo tallaabooyin la xidhiidha sidii loo abuuri lahaa goobo shaqo oo jinsi ahaan isku dheeli tiran, kaasoo lagu tilmaami karo degaan/bey'o habboon marka la fiiriyo dhammaan shaqaalaha, gaar ahaan dumarka.
- Waxa jira " qorshe jinsi' oo dejisan kaasoo ku yaala hoos, si loogu qoro tallaabooyin gaar ah oo la qaadi karo marka dib loogu noqdo goobihii shaqada kuwaasoo khuseeya yoolalka siyaaadda jinsiga. Tusaale bar bilow kaasoo kuu noqon kara ayaa lagu siiyay.

## Qorshaha Tallaabooyinka la Xidhiidha Jinsiga

Adiga oo ku salaynaya wixii aad ku baratay kulanka, fadlan waxa aad soocdaa 3 arrimood oo laga qaban kara goobtaada shaqada si loola tacaalo qaar ka mid ah arrimaha la xidhiidha jinsiga ee inta badan dhaca isla markaana gacan ka gaysan kara gaadhista odhaah siyaaadeed oo noqota Siyaasadda Qaranka ee Jinsiga. Tusaale ayaa hoos lagugu siiyay.

| Shaqada | Cidda ka masuulka ah? | Xilliga? |
|---|---|---|
| *Waxa aad baadhis ku samaysaa arimaha la xidhiidha jinsiga ee shaqaalaha golaha degaanka. Tusaale ahaan, imisa ayaa shaqaalaha haween ah? maxay qabtaan? imisa ka mid ah ayaa xilal sarsare haya?* | *Koox yar oo ka kooban sarkaalka u qaabilsan shaqaalaha iyo 2 kale. ugu yaraan waa inay ku jirtaa 1 haween ahi.* | *4 todobaad gudahood marka tababarka lasoo gabagabeeyo.* |

**Kulanka 4**

# Beddelka, Dalacsiinta, Hoos u-celinta

## Ujeedooyinka Kulanka

Gabagabada kulankan, ka qaybgalayaashu waxa ay awoodi doonaan in ay:

- Tilmaan ka bixiyaan xaaladaha keeni kara beddel, dalacsiin ama hoos u celin.
- In ay qabtaan hawlaha maamul ee la xidhiidha beddelka iyo dalacsiinta, iyada oo la adeegsanayo foomamka loo baahanyahay.

## Qodobo muhiim ah —Beddel, Dalacsiin, Hoos-u celin

- Duqa iyo xoghayaha fulinta ayaa awood u leh beddelka shaqaalaha ee dhanka gudaha. Beddelada waa in lagu saleeyo baahiyaha shaqo ee golaha degaanka iyo kartida ee aan lagu salayn qabyaalad, qoys, diin iyo jinsi.
- Dalacsiintu waxa ay noqon kartaa mid ama kor loogu kaco tallaabo (darajada oo korodha) ama mid dhanka dhinacyada ah ( oo darajo dhexdeeda qofku ku koro).
- **Dalacsiin kor loo kaco** waxa la heli karaa marka::
    - marka jago bannaanaato sarkaalkuna buuxiyo shuruudaha ( isaga oo imtixaan lagu tartamayo u marayo)
    - sarkaal waxa uu ugu gudbi karaa jago sare haddii uu aqoon u leeyahay ( sida shahaado jaamacadeed ).
- **Dalacsiin jiif ah (dhinacyada ah)** waxa lagu heli karaa in lagu qiimeeyo qofka in uu yahay 'mid aad u wanaagsan' , 'wanaagsan' ama 'caadi ah' marka qiimaynta sanadlaha ah la sameeyo.
- **Hoos u celin** waa hoos u celin lagu sameeyo sarkaal jago hoose marka la barbardhigo ta uu hayo, tanina waxa ay ka dhalataa anshax marin (eeg kulanka 5 ), ama qiimaynta waxqabadkiisa o
ama 'aad u liito'.
- sarkaal loo aqoonsaday in kartidiisu sarayso,
anshaxiisuna wanaagsanyahay ayaa xaq u leh
iyada oo loomarayo hababkan:
    - Warqad qoran oo maamuus
    - Shahaado sharaf
    - Abaal marin/xaddi lacageed loo siiyo ahaaneed

### Xiriirka buugga shaqaalaha


Xog dheeri ah, ka eeg buugga shaqaalaha:

**8.1 beddelada golaha degmada dhexdiisa**


**8.2 dalacsiinta**

**8.3 hoos u celinta**

## Jaantuska 2: Maamulka Beddelka



## Jaantuska 3: Maamulka Dalacsiinta



**Tusaalaha 1: Foomka Codsiga Dalacsiinta** (eeg *Lifaaqa 18* ee buugga maamulka shaqaalaha)

| FOOMKA CODSIGA DALACSIINTA | |
|---|---|
| GOLAHA DEGAANKA ABYAN | Ciwaanka:<br>Tel:<br>Email: |
| KU CELI FOOMKAN WAAXDA MAAMULKA SHAQAALAHA | |

| | |
|---|---|
| Ka: | Ali M. |
| Waaxda: | Maamulka iyo lacagta |
| Qaybta /waaxda: | Xisaabaadka |
| Taariikhda: | 15 Dec 2015 |

| CODSIGA DALACSIINTA |
|---|
| 1. Waxa aan jeclahay in aan codsado dalacsiin (sheeg darajada cusub, tallaabada ama jagada).<br>Darajada B, Tallaabada 6 (layga dalacsiiyo jagada haatan ee darajada B, Tallaabada 7)<br>2. Sababaha aan u cuskanayo codsigani waa kuwan soo socda:<br>▪ Waxa laygu qiimeeyey in aan 'aad u wanaagsan' qiimayntii waxqabadkayga ee 12 kabilood ahayd.<br>▪ Waxa la isiiyay shahaado sharaf lagu maamuusay xalliibnaanta shaqadayda iyo hawlkarnimada doorkayga xisaabiye ahaan.. |

| FAALOOYINKA WAAXAHA | |
|---|---|
| Faallooyinka agaasimaha waaxda:<br>Ali waa qof dedaal iyo karti badan waxaanan taageersanahay codsigiisa dalacsiinta ee uu rabo in la gaadhsiiyo B6 | |
| Saxiixa agaasimaha waaxda: | M. Hassan |
| Magaca iyo darajada Agaasimaha Waaxda: | M. Hassan, agaasimaha waaxda maamulka iyo lacagta |
| Taariikhda: | 15 Dec 2015 |
| GO'AANKA XOGHAYAHA FULINTA | |
| Codsig in la ogolaado/aan la ogolaan: | La ogolaaday |
| FAALLOOYINKA XOGHAYAHA FULINTA: | |
| Saxiixa Xoghayaha Fulinta: | I Trustworthy |

| | |
|---|---|
| Magaca xoghayaha fulinta: | Ibrahim Trustworthy |
| Taariikhda: | 17 Dec 2015 |
| **TALLAABOOYINKA WAAXDA MUSHAHAAROOYINKA IYO KUWA WAAXDA SHAQAALAHA** | |
| TALLAABO | SAXIIXAY |
| 1. Rikoodhka shaqaalaha in la wargaliyo. | Asha S. |
| 2. Isbeddelka mushahaarada in la ogaado. | Asha S. |
| FAALLOOYIN/QORAALO | |

**Tusaalaha 2: qoraalka ogaysiinta dalacsiinta** (eeg ***Lifaaqa 19*** ee buugga shaqaalaha)

**GOLAHA DEGMADA ABYAN**
**WARQAD GUDAHA AH**

**KU:** **Ali M.**

**KA:** **Xoghayaha fulinta**

**TAARIIKHDA:** **21 December 2015**

**UJEEDDO:** **OGAYSIIN KU SAABSAN CODSIGII DALACSIINTA**

---

1. Waxa aan tixraacayaa codsigaagii dalacsiinta ee ku taariikhaysnaa 15 December 2015.
2. Waxa aan rabaa in aan kugu wargaliyo in codsigaagii uu aqbalay gudida golaha degaanku.
3. Sababaha go'aankan lagu saleeyay waa sidan soo socota:

- in lagugu qiimeeyey in aad 'aad u wanaagsantahay' markii la fiirinayay waxqabadkaagii sanadkan.

4. Tallaabooyina ay tahay in ay qaadaan waaxaha shaqaalaha iyo lacagta ayaa loo qaadi doona hab waafaqsan go'aankan.
5. Waan kugu hambalyaynayaa dalacsiintaada waxaanan soo dhawaynayaa dadaalkaaga iyo waxqabadkaaga dhanka degmada.


I.Trustworthy

Xogahayaha Fulinta
Taariikda: 21 December 2015

CC: Agaasimaha Waaxda
Sarkaalka Shaqaalaha
Sarkaalka Mushahaarooyinka

## Su'aalo laga doodayo

- Idinka oo ku salaynaya tusaalaha kore, falanqeeya arrimahan soo socda:
  - Dalacsiin caynkee ah ayuu Ali codsaday, mid kore mise mid hareeraha ah? Sideed ku garatay?
  - Waajibaad caynkee ah ayaa kaga qaybay Caasha, sarkaal shaqaale ahaan, hawshan?







## Dib-u eegis iyo tallaabo

- Kulankan waxa looga gol lahaa in lagu asteeyo habraaca iyo shaqooyinka loo baahanyahay si loo sameeyo beddel iyo dalacsiin.
- Tani macnaha ay u leedahay degmooyinku waa in loo baahandoono in loo adeegsado foomamkan lana raaco habraaca goobaha shaqada dhexdooda, sida ugu suuragalsan.
- Gabagabada buuggan ka qaybgalaha, waxa ku jira qorshe hawleed tallaabooyin dheeri ah lagaga qaadi karo goobaha shaqada. Adiga oo ka faa'iidaysanaya wixii aad ku baratay kulankan, geli qorshaha hawsha arrin ku saabsan sida hore loogu soconayo marka la fiiriyo hirgalinta buugga maamulka shaqaalaha goobta shaqada dhexdooda

**Kulanka 5**

# Anshax Marinta Iyo Cayrin

## Ujeedooyinka kulanka

Gebogabada kulankan, ka qaybgaluhu waxa uu awoodi doona:

- Sooc waxa aad dambiyar, ama mid halis ah u taqaan iyo tallaabada anshax marineed eek u dabaqanta .
- Samee habraacyada loola tacaalayo noocyada kala duwan ee anshaxmarinta hab waafaqsan buugga maamulka shaqaalaha.



## Caasha sarkaalka shaqaalaha u qaabilsan

- Caasha waa sarkaalka maamulka shaqaalaha u qaabilsan Golaha degmada Abyan.
  aad ayay ugu dadaashaa shaqadeeda waxaanay ilaalisaa daacadnimada laga filayo saraakiisha golaha degmada
- Iyada oo masuuliyadaheeda ka mid ah, Caasha waxa ay ka mas'uultahay maaraynta dhanka habraaca ee arrimaha anshaxmarinta ee ay sameeyaan guddida shaqaaluhu. Guddida shaqaalahu waxa ay masuul ka tahay maaraynta dhammaan habdhaqanada xun iyo arrimaha anshaxmarinta. ***Sawirka 4*** ee hoose waxa uu muujinayaa qaabka uu u dhisanyahay gudida shaqaaaluhu.
- Si loo hubiyo in haab joogto ah oo isku mid ah loo marayo dhaqangalinta habdhaqanka, dhammaan habraacyada anshaxmarinta waa in si wanaagsan loo qoro, qoraalo sax ahna laga dhigo waaxda shaqaalaha iyo maareeyaha ay khusayso.

## Su'aalo la isla falanqaynayo

- Ma sheegi kartaa tusaalayaal aad ku aragtay goobtaada shaqada oo tilmaamaya 'habdhaqan wanaagsan iyo daacadnimo?'
- ma jiraa nidaam rasmi ah oo loo maareeyo arrimaha la xidhiidha anshaxmarinta goobtaada shaqada dhexdeeda? maxay muhiim u tahay in nidaam la yeeshaa?


## Xiriirka buugga shaqaalaha

xog dheeri ah, eeg buugga shaqaalaha:

**8.5 Anshax**

**8.5.1 Doorka Guddiga Shaqaalaha iyo Dalacsiinta**

## Jaantuska 4: Guddiga Shaqaaalaha iyo Dalacsiinta



# Jaantuska 5: Arrimaha la xiriira Geedka Go'aanka iyo habraaca

**Waa sheegasho hab-dhaqan xun, sida ku qeexan 8.5.2 ee buugga maamulka shaqaalaha?**

**MAYA**

**Dembiyada soo noqnoqda iyo kuwa yaryar, waxa loola tacaali karaa hab waafaqsan habraaca, habwaafaqsan buugga shaqaalaha qaybtiisa 8.6.1.**

**HAA**


**Dhannaan xaaladaha la xidhiidha ficilada aad ka u xun waa in loo diro guddida shaqaalaynta loona maareeyo habwaafaqsan qodobada 8.6.2 ee buugga shaqaalaha (eeg sawirka *6aad*).**

*Habraaca:*
Digniin afka ah oo tilmaamaysa nooca xadgdubka. In wax qoraal ah oo rasmi ah laga sameeyo arrintan looma baahna.

Haddii aan wax horumar ah la samayn, digniin qoraal ah oo lagaliyo faylka qofka ayaa la samayn doona.




Haddii wali aan wax horumar ah la samayn, qoraal **labaad** oo digniin ah ayaa la samayn doona.
Haddii aan digniino kale la samayn sanad kadib, digniinaha waxa laga saari doonaa faylka sarkaalka ee shaqada.




Haddii digniin sadexaad oo qoran loo baahdo, waxa ku lug yeelan doona arrinta **Guddiga Dalacsiinta iyo Anshax Marinta**.
Hadii sarkaal la siiyo digniin sadexaad iyo ciqaab uga timaadda gudida shaqaalaha, tani waxa ay ku jiri doontaa faylkiisa shaqada.



# Jaantuska 6: Habka Loo Maamulayo Hab-Dhaqanka aadka u Xun

**1. Qoraal ku saabsan dhaqan xumada**

Dhammaan eedaha la xidhiidha hab-dhaqanada xun waa in la qoro nuqulna uu hayo sarkaalka shaqaalaha iyada oo la geliyo faylka sarkaalka arrinu khusayso.

**2. Qoraal dhamaystiran**

Qoraal dhamaystiran oo ka waramaya dhaqan xumada waa in uu diyaariyo qofka keenay eedaha dhaqan xumadu waan in uu nuqul siiyo sarkaalka la eedeeyey si uu u diyaariyo qoraal uu isku difaacayo

**3. Guddi u saar dhagysiga wakhtina u**

Haddii wax eedaymayo ah oo faldambiyeed aanay ku lug lahayn, guddida shaqaaluhu waxa ay mudayn doonaan dhagaysiga anshax marinta, iyada oo aan dib looga dhigayn muddo **10 maalmood** gudahood ah marka eeduhu soo gadhaan.

Dhegaysiga waa inay ka qabygalaan ugu yaraan **3 xubnood**.

**4. Dhageysiga**

Dhageysigu waxa uu noqon doonaa mid albaabadu u xiran yihiin oo ay ka soo qaybgalaan kaliya saraakiisha ay khusayso dacwaddu.

Daqiiqadda waxa qoraya sarkaalka u qaabilsan shaqaalaha, isagaoo isla markaana ah xoghayaha maamul ee gudida.

qoraalku waxa uu noqon doonaa sir waxaana fayl amnigiisu suganyahay ku hayn doona sarkaalka maamulka shaqaalaha u qaybsan.

**5. Go'aan**

Gudida Dalacsiinta iyo Anshax Marinta waxa uu qaadan doonaan go'aankiisa muddo **5 maalmood** gudahood ah marka dhegaysiga dacwaddu dhaco.

Go'aanka waxaa lasiin doonaa sarkaalka laxukumay, kormeerihiisa iyo agaasimaha waaxda.

Kadibna go'aanka waxaa lagu shaacinayaa **1 maalin oo shaqo**, waxaana lagu soo dhejinayaa boodhka ogeeysiisa Golaha Degmada.

## Layliga 3.4: Ciqaabaha iyo Xadgudubyada

Layligan waxa loo qaabeeyey in uu ku baro qaybaha kaala duwan ee xadgudubyahada iyo ciqaabaha ka dhasha.

Waxa aad tixraacdaa liiska hoos ku qoran ee xadgudubyada iyo ciqaabaha waxaanad u habaysaa qaybaha saxa ah (qaar fudud, qaar intabadan dhaca, qaar halis ah ) habwaafaqsan ***warqadda 3aad ee layliga*** ee hoose.

Waxa aad u baahan doontaa in aad tixraacdo qaybta 8.5.2 ee ku saabsan Ciqaabaha iyo xadgudubyada ku jira buuggaaga maamulka shaqaalaha. Waxa aad ogaataa in laba xadgudub iyo laba ciqaabood ay kujiraan qayb kasta.

- Digniin afka ah
- Violating of Official Secrets
- Digniin qoraal ah
- Shaqada oo cudurdaar la'aan looga maqnaado si soo noqnoqota
- Hoos in loogu celiyo hal heer darajo
- Si khaldan oo loo adeegsado jago rasmi ah iyada oo loo adeegsanayo dano shaqsi
- Dib dhac ku yimaadda dalacsiinta ama kororka tallaabo.

### Xiriirka buugga shaqaalaha

Xogo kale oo dheeri ah waxa laga heli karaa buuggaaga shaqaalaha:

**8.5.7 Saamaynta dacwadaha maxkamadda**

**8.5.8 Cayrinta**

**8.5.9 Dib-u shaqogelinta shaqaalaha la eryo**

## Xaashida 3aad ee Layliga: Qaybqaybinta Xadgudubyada iyo Ciqaabaha

| | Yar/ Fudud | Caadi ah | Daran |
|---|---|---|---|
| **Xadgudubyo** | | | |
| **Ciqaabta** | | | |

## Dib-u eegis iyo Tallaabo

- Kulankan waxa aan ku aragnay qaar ka mid ah ficilada loo arki karo qaar yaryar, caadi ah ama qaar daran, iyo sida ciqaabuhu ugu kala dabaqmaa.

- Waxa muhiim ah in dhammaan shaqaalaha golaha degaanku ay ka warqabaan noocyada kala duwan ee habdhaqanada guracan iyo ciqaabaha ka dhalan kara. Waxa masuuliyadda hirgalintu fuulaysaa waaxda maamulka shaqaalaha iyo saraakiisha kale ee sarsare sida agaasimayaasha waaxaha, si ay ugu hirgaliyaan degmooyinka gudahooda.

- Gebogabada buugganka qaybgalka, waxa ku jira qorshe ficin oo sahlaya in la qaado tallaabooyin dheeri ah goobaha shaqada dhexdooda. Adiga oo ka faa'iidaysanaya wixii aad kabaratay kulankan dhexdiisa, waxa aad qoraal galisaa qorshahaaga hawsha fikir ku saabsan sidii hore loogu sii riixi lahaa hirgalinta buugga shaqaalaha. Laba tusaale ayaa lagugu siiyay hoos.
  - *Hubi in dhammaan shaqaalaha golaha degmadu ay ka warqabaan xadgudubyada kala duwan ee ciqaabaha ku dabaqma.*
  - *Hubi in habraacyada lagula tacaalayo arrimaha la xidhiidha anshaxmarintu ay dejisanyihiin*

**Kulanka 6**

# Shaqo ka fariisin

## Ujeedooyinka kulanka

Gebogabada kulankan, ka qaybgaluhu waxa uu awoodi doona in uu:

- Sharxo waxa looga jeedo jabinta sharciga marka la biiriyo xuquuqda qoyska qofku yeelanayo .
- In la dabaqo habraacyada saxa ah ee shaqo ka fariisinta sida ku cad buugga maamulka shaqaalaha.

## Qodobo muhiim ah –Shaqo ka

Qaybta 9aad ee buugga maamulka shaqaa
dhammaan noocyada shaqo ka fadhiisinta
(marka laga reego kuwa xidhiidhka la leh e
noocyada shaqoka fadhiisinta waxa ka mid

- Hawlgabka da'da la xidhiidha
- Hawlgabka ka dhasha laxaadli i
- Shaqada dhexdeeda oo lagu dhintay
- Gebogabaynta qandaraaska ee

## Xiriirka buugga shaqaalaha

Xog dheeri ah waxa aad ka eegtaa buugga shaqaalaha:

**9.1 Da'da hawlgabka**
**9.2 Hawlgabka ka dhasha xanuun ama laxaad li'ida**
**9.3 Shaqada oo lagu dhinto iyo xuquuqda qoyska hadhay**
**9.4 Gebogabaynta qandaraaska shaqaalaha qandaraaslayaasha ah**
**9.5 Xuquuqda shaqo ka cayrinta**

Arrimaha la xidhiidha ku dhimashada shaqa

- Haddii sarkaal ku dhinto isaga oo ku ... qoyskiisa la ogyahay waxa ay xaq u yeelanayaan magdhaw.
- Hadda ma jiro xeer laga wada simanyahay oo maamula magdhawga—magdhawga qoysku helayo waxa dejisan kara golaha degmada ee meeshaas, hab waafaqsan siyaasadeeda iyo awooddeeda maaliyadeed ee ay ku bixin karto magtaas.
- Si kastaba ha ahaatee, siyaasadahani waa in aanay ka horiman sharciga. Burinta sharciga waxa ka mid noqonaya haddii:
    - Shaqada qofkii dhintay in la siiyo xubin ka soo jeeda qoyskiisa, qoladiisa ama qaraabadiisa. Jagada bannaan waa in loo buuxiyo qaab ka waafaqan Qaybta 7aad, Shaqaalaynta, ee ku sugan buugga maamulka shaqaalaha.
    - Magdhawga la bixiyay in ay muujinayso takoor ku salaysan beel, qoys, jinsi, diin ama sifo kale oo uu leeyahay qof magdhawga qadanayaa.

# Jaantuska 7: Habka loo marayo shaqo ka fariisinta

**1. Ogaysiis qoraal ah**

Ogaysiin qoraal ah oo ku saabsan rabitaanka in lahawlgabo ama la is casilo taasoo lagu hagaajinayo korjoogaha (iyada oo la adeegsanayo foomka kala talo bixinta shaqo ka fadhiisiga ee ku jira ***Lifaaqa 5***?)

**2. La kulan sarkaalka shaqaalaha u qaabislan**

Sarkaalka shaqada ka fadhiisanayaa waxa uu la kulmi doonaa sarkaalka u qaabilsan shaqaalaha si uu ula eego arrimahan soosocoda:

- Xuquuqda hawlgabka.
- Xuquuqaha caafimaad hawlgabka ka dib.
- Xuquuqda shaqo ka tagista.
- Dib-u soocelinta hantida golaha degmada hadii loo baahdo.
- In laga shaqeeyo sidii loo sii wada qaadan lahaa dhamman fasax sanadeedyada hadhay ka hor is casilaadda iyo diyaargaraynta shaqaalaha beddelaya.

**3. Warqadda waaxda shaqaalaha**

Marka laysla qaato wixii xuquuq ah, sarkaalka waaxda shaqaaluhu waxa uu qoraal ku soo koobi doonaa wixii laysla qaatay isaga oo u diraya xoghayaha fulinta, kaasoo isna ogolaan doona bixinta lacagtaas.

Marka arrinta uu ogolaado xoghayaha fulintu, warqadda tagista ee sarkaalka ayaa la diyaarin doonaa lana saxiixi doonaa.

**4. Caddaynta tegista**

Maalin ka hor inta aan shaqo ka fadhiisigu dhaqan galin, warqad caddaynaysa inaan waxba lagu lahayn ayuu buuxin doonaa sarkaalka tegayaa waxaanu u dhiibi doonaa sarkaalka shaqaalaha (eeg ***Lifaaqa 20*** ee ku jira buugga shaqaalaha).

**5. Warqadda waaxda shaqaalaha**

Maalinta ugu dambaysa shaqada, sarkaalka waaxda shaqaaluhu waxa uu siin doonaa warbixin tilmaamaysa xuquuqaha uu yeelan doono qofka shaqada ka tegayaa, hadii ay jiraan xuquuqahaasi. Warqadda waxa ogolaan doona isla markaana saxeexi doona xoghayaha fulinta. Sarkaal waaxda shaqaaluhu waxa uu sidoo kale siin doonaa sarkaalka tagaya shahaado muujinaysa mudadii uu shaqaynayay (eeg ***Lifaaqa 21*** ee ku jira buuga shaqaalaha).

## Dib-u eegis iyo Talaabo

- Kulankan waxa lagaga hadlay habka shaqo kategista ee shaqaalaha golaha degaanka marka ay hawlgabka noqonayaan ama iska casilayaan jagooyinkooda.
- Waxa kale oo lagu eegay waxa la ogolyahay dhanka xuquuqda, iyo waxa noqon kara jabin sharci. Tusaale ahaan inla shaqaysiiyo xubin ka soo jeeda qofkii tagay si loo buuxiyo jagada bannaan. Tani waa ay ka duwanaan kartaa sida haatan ay u dhaqmaan degmooyinka qaar, waana in ay isla falanqeeyaan shaqaalaha sare hadii sidaas xaalku yahay.
- Gebogabada buuggan ka qaybgalka waxa ku jira qorshe hawlgal oo sahli kara in tallaabo dheeri ah la qaado. Adiga oo dhaqan gelinaya wixii aad baratay, waxa aad wax ka qortaa qorshaha hawsha adiga oo qoraya wax ku saabsan sidii hore loogu socon karo hirgalinta buugga maamulka shaqaalaha. Tusaale ayaa hoos lagugu siiyay .

*Dib-u eegis ku samee siyaasadda golaha degaanka ee ku saabshan dhimashada goobta shaqada gudaheeda iyo xuquuqda lagu heli karo. Hubi in siyaasaddu tahay mid golaha degaanku awoodo joogtaynna karo mudada fog, hubina in aan siyaasaddaasi ka hor imanayn sharci sida ku cad qaybta 9.5 ee buugga shaqaalaha.*

# Qorshaha Hawsha

Diyaari qorshe hawleed marka aad ku noqoto goobtaadii shaqada, adiga oo ku salaynaya wixii aan ku baratay tababarkan.

| Hawsha | Cidda ka masuulka ah? | Wakhtiga lagu dhamaynayo? |
|---|---|---|
| *Laga soo bilaabo Kulanka 1: waxa aad hubisaa in la daabacay xaashiyo (A5) iyo nuqulo elegtronig ah oo ee buugga gacanta ee* ***UCoS iyo Fasaxa*** *si loo siiyo dhammaan shaqalaha degmada iyo xubin kasta oo shaqaalaha ah oo cusub.* | *Aniga oo ah sarkaalka shaqaalaha u qaabilsan, aniga oo taageero ka helaya shaqaalaha sare, sida agaasimayaasha waaxaha.* | *4 todobaad gudahood marka tababarka la soo gabagabeeyo.* |

# Gunaanad

## Gundhig

Tababarkan waxa aad ku baratay arrimahan soosocda:

- Shuruudaha adeegga iyo kuwa fasaxa eek u dabaqma dhammaan shaqaalaha golaha degmada una baahan in laga dhaqan galiyo dhammaan golayaasha degmada .
- Shuruudaha caafimaad iyo kuwa badbaado ee goobaha shaqada ee golaha degaanka iyo baahida loo qabo qorshe caafimaad iyo mid shaqo, isku dubba ride iyo liis hubineed oo gole kasta oo degaan yeesho.
- Arrimaha jinsiga la xidhiidh ee dhanka shaqada ee lagula kulmo goobaha shaqada iyo tallaabooyinka la qaadi karo si loo abuuro goob shaqo oo dad kala duwani isugu yimaadaan.
- Meerto nololeedka maamulka shaqaalaha arrima la xidhiidha sida beddelka, dalacsiinta, hoos u celinta iyo qaabka loomaamulayo arrimahaas.
- Arrimaha la xidhiidha anshaxa oo ay ku jiraan xadgudubyada iyo ciqaabaha iyo habraacyada la raacayo hadii gefef dhacaan.
- Shaqo ka fadhiisiga qof shaqaale ah oo ku timaadda hawlgab, iscasilaad iyo habraacyada loo marayo.

**Muhiim !**

Waxa sidoo kale lagu waydiiyay in aan dhamaystirto waxyaalaha ku jira qorshaha hawsha, eeu baahan in la dhaqan galiyo marka aad ku noqoto goobtiishaqada adiga oo u samaynaya cidda ka masuulka ah iyo wakhtiga iyo habka looga warhayanayo.

## Dersid (Assessment)

Sii loo gudbo qaybtan, waxa aad u baahantahay in aad gudubto qiimaynta, waxaana diyaarin doonaa qiimayntaas tababarahaaga.

## Qiimaynta (Evaluation)

Tababarahaagu waxa uu ku weeydiin doonaa in aad warbixin ka siiso tababarkan aan ka qaybgashay, adiga oo markaa u fadhiisanaya imtixaan. Warbixintaadu waxa ay gacan ka geeysan doontaa in lasii hagaajiyo tababarkan.

*Mahadsanid!*

# Eray bixin

| | |
|---|---|
| **Guddi** | Waxaa looga jeedaa Gudida Shaqaalaha ee Dowlad Goboleedka Puntland |
| **Heshiisyada Qandaraaska** | Heshiiska Shaqalaaynta ee shaqaalaha lala galo muddo cayiman, mushaharo iyo xuquuqda shaqo ka tegiddina lagu cayimo. |
| **Hoos udhigid** | Hoos u dhigida derajada shaqo ee qofka shaqaalaha ah. |
| **Waax** | Waxaa looga jeedaa waax shaqo oo katirsan maamulka Golaha Degmada taas uu masuul ka yahay sarkaal sare sida Agaasime tusaale ahaan Waaxda Lacagta iyo Maamulka. |
| **Degmo** | Waxaa loojeedaa degmooyinka uu sharcigu ogol yahay ee gobolada Dolwadda Puntland ka kooban yihiin. |
| **Qoys** | Waxaa loojeedaa koox bulsho oo ka kooban ruux shaqaale ah, xaaskiisa/ninkeeda iyo caruurteeda/tiisa. |
| **Derajo** | Magacyada derajooyinka lagu qaybiyay sida lagu qeexay mushaarka iyo qiyaasta darajayta ee la oggolaaday. |
| **Madax** | Waxaa loojeedaa madax qaybeedyada iyo waaxeedyada dawladda hoose. |
| **Sarkaalka Maamulka Shaqaalaha** | Shaqsiga masuuliyad ahaan ugu sareeya maamulka shaqaalaha, marka laga reebo Agaasimaha, magacaas ha wato amase yuu wadanne. Waxa uu lamid yahay Sarkaalka Shaqaalaha. |
| **Unugga Maamulka Shaqaalaha** | Tibixdan waxaa adeegsada dhamaan qaybaha, waaxaha iyo unugyada masuulka ka ah maamulka hawlaha maamulka shaqaalaha ee Golaha Degmada. Gole kasta oo Degmo waxa uu yeelan doonaa unugga ama qof noocaas ah, laakiin waa xajmiga iyo magaca waxa kala duwanaanayaa. Tusaale ahaan, Dawladda Hoose ee Hargeysa waxa ay leedahay Qayb Maamul Shaqaale. Golayaasha degmada leh derajooyinka C and D waxa ay yeelan karaan Sarkaal shaqaale ama Sarkaal maamul shaqaale. Marka buugga sheegayo Unugga Maamulka Shaqaalaha, micnuhu waa in kooxda masuulka ka ah Maamulka Shaqaalahu ay masuulka tahay habraacyadaas. |
| **Heer** | Waxaa looga jeedaa qaybo loosii kala jarjaray qayb sida ku cad mushaarka iyo qiyaasta darajayta ee la oggolaaday. |
| **Duqa** | Madaxa Maamulka Degaanka |
| **Wasaarad** | Wasaaradd Arrimaha Gudaha,D/ Hoose iyo Horumarinta Reer Miyiga (MILGRD) |

| | |
|---|---|
| **Sarkaalka Shaqaalaha** | Shaqsiga mas'uuliyad ahaan ugu sareeya shaqaalaha, marka laga reebo Agaasimaha, magacaas ha wato amase yuu wadanne. Waxa uu lamid yahay Sarkaalka Maamulka Shaqaalaha. |
| **Qaabdhismeedka Hay'adeed** | Waxa uu kakooban yahay qaybo, dhinacyo ama barnaamijyo kuwaas oo waxqabadyada iyo shaqooyinka lagu saleeyay, loona qoondeeyay, marka la eego Hanaanka Kormeerka ee Kalasarraynta Golaha Degmada - ee jiheeyay kuguulaysashada yoolasha siyaasadeed ee Golaha Degmada. |
| **Mushahaar** | Waxaa loojeedaa qaddarka lacagta ee bil walba lasiiyo shaqaalaha iyada oo looga bedelanayo shaqadooda. |
| **Ka fadhiisad** | Waxaa looga jeedaa kategitaanka shaqada Golaha Degmada. |
| **Beddel** | Waa wareejin muddo dheer ah iyo xubin shaqaale ah oo mushaharkiisa loo wareejiyo Golaha Degmada uu lashaqaynayo. Xubinta shaqaalaha ah sidoo kale waxaa maamulaya degmada ama hay'adda uu lajoogayo. Bedelaaddu waxa ay noqon kartaa mid waqti dheer ( sida hal sano) ama joogto. Tan danbe marka la eego, masuuliyadda shaqaalaha waxaa loo wareejiyaa hay'adda uu u shaqaynayo. |
| **Dhaawac Shaqo** | Dhibaato saamaysa qof shaqaale oo ka dhalata cudur kadhasha goobta shaqada ama dhaawac kadhasha shil shaqaalaha kasoo gaadha shaqada dhexdeeda ama sabab laxidhiidha ama jidka shaqada loo maro ama lasoo maro marka lagasoo noqdo taas oo oo shardi u tahay in safarkaas tegitaanka iyo kasoo noqoshadu yahay mid toos ah oo aan joogjoogsi lahayn, amase aan laga weecan jidkii saxda ahaa. |

# Ilo

In la sii horumariyo

1. Waa mxay Maamul Shaqaale? (What is Human Resource Management)?
   http://humanresources.about.com/od/glossaryh/f/hr_management.htm

1. Buugga Maamulka Shaqaalaha ee Dawladaha Hoose ee Maamul Goboleedka Puntland, Wasaaradd Arrimaha Gudaha,D/ Hoose iyo Horumarinta Reer Miyiga, Nugulka Koowaad ee Qabyada ah, Luulyo 2014.